## Xeerarka Rakaabka

- Sii xogta safarka dhamaanteed xiriiriyaha (tusaale: xayawaanka cuuryaanka kaalmeeya, gelbiyaha/dhaweeyaha, kaalmada loo baahan yahay, iwm.) Codsiyada dalabkoodu macquulka yahay waa in la sameeyaa wakhtiga safarka balantiisa la dhigayo
- Darawaladu isbeddel kuma samayn karaan safarka loo qorsheeyay ilaa uu xafiiska xiriirinta soo ogolaado
- Diyaar u sii ahoow marka baskaagu yimaado oo bixi qiimaha saxda ah (ama token ka lagu raaco baska) marka aad baska raacayso
- Baska gudihiisa looma ogola cunto ama cabitaan furan
- Shaarar iyo kabo in la xirnaado/gashnaado waa lebbiska loo baahan yahay
- Rakaabka oo dhan ***WAAJIB*** ayay ku tahay in ay xirtaan suunka kursiga oo ay fadhiyaan ilaa basku si dhammaystiran uga joogsado
- Xayawaanka oo dhan waa in ay ku jiraan sidaha marka laga reebo xayawaanka u adeega dadka cuuryaanka ah
- Lama ogola sigaar cabbid, dagaal, ama wax tuuris
- Khamri cabitaan waa ka mamnuuc baska dhexdiisa
- Hubku waa ka mamnuuc baska dhexdiisa
- Wax dareere guban kara ah ama baytariyada baabuurta looma ogoal baska dhexdiisa
- Marnaba ha faragelin hawsha baska
- Ixtiraam darawalada buska iyo rakaabka kale.
- Hadalada iyo hab-dhaqanka loo tarjumi karo weerar ama hanjabaad waa ka mamnuuc baska waxayna sababi kartaan in adeegyada lagaa joojiyo
- Tri-CAP masuul kama aha alaabta baska dhexdiisa lagaga tago
- Xeerka Xirmadaha Alaabta: Si loo dhowro raaxada iyo badbaadada rakaabka Tri-CAP dhammaantood, xirmadaha alaabta qofka waxay ku koobnaan doonaan qaddarka rakaab kasta uu qaadi karo hal safar. Alaabta lagu qaado baska waa in uu haystaa qofka rakaabka ah mana xayiri karaan meesha la maro ama kursiga curyaanka halka lagu xiro. Darawaladu waxay howshoodu ku kooban tahay in ay rakaabka ka caawiyaan hal safar oo kaliya waxayna uga qaadi doonaan ugana dejin doonaan xirmadaha alaabata jidka iyo guriga dhiniciisa sii socodka iyo soo laabadkaba. Rakaabka waxaa loo ogol yahay in ay ku safraan gaari gacan 2-logood leh iyo in ay qaataan xirmad alaab oo isku darka culeyskeedu aanu ka badneyn 35 rodol (pounds). Rakaabka waxaa looga baahan yahay inay sameytaan qaabab kale haddii loo baahdo gargaar dheeraad ah. Waxyaalaha ka baxsan nidaamka sharcigaan waxaa loo samayn doonaa rakaabka ka safraya goobaha cuntada lagu qeybiyo ee deegaanka.

Tri-CAP Transportation waxay xaq u leedahay inay u diidaan gaadiidka qof kasta oo aan u hoggaansamin xeerarka adeega la dejiyay.

## Hadafka Tri-CAP:

Hadafka Tri-Cap waa in la balaariyo fursadaha dhaqaale iyo fayoobi qabka ee dadka deggankeena degan iyo bulshadeena

## Barnaamijyada kale ee laga bixiyo Tri-CAP

- Kaalmada Guriyeynta
- Kaalmada Tamarta
- Barnaamijka Caawinta Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)
- Kaalmada Cashuuraha
- Dib u dhiska Nolosha
- Hantida Qoyska ee Madaxbanaanida Minnesota (Family Assets for Independence

## Faallooyinka Rakaabka & Cabashooyinka

Faallooyinka iyo cabashooyinka waxaa laga diiwaan gelin karaa Agaasimaha Gaadiidka adiga oo ka wacaya lambarka degaanka ee 320-251-1612, lacag la'aan 888-765-5597, ama qoraal ahaan Agaasimaha Gaadiidka Tri-CAP, P.O. Box 683, Waite Park, MN 56387-0683. Waxa kale oo aad nagala soo xiriiri kartaa general@tricap.org

*Qofna looma diidi karo raacitaan gaadiika iyada oo lagu saleynayo isir, midab, asal qaran, diin, jinsi, naafo jireed ama maskaxeed, xaaladda guurka, xiriirka siyaasadeed, heerka kaalmada dadweynaha, nooca galmada, ama heerka ciidannimo.*

Scan to pay

TOKEN TRANSIT

7.23

Tri-CAP INC. TRI-COUNTY ACTION PROGRAM
Helping People. Changing Lives.

# Hagaha Gaadiidka Rakaabka



Tri-CAP Transit Connection (Isku xirka Tri-CAP) waa barnaamijka gaadiidka **dadweynaha** ah oo ay ka go'an tahay in uu sameeyo adeeg badbaado leh, oo la isku haleyn karo, qiimihiisu macquul yahay, isla markaana xushmad leh

(320) 251-1612
(888) 765-5597
www.tricap.org

# Warbixin guud

Tri-CAP Transportation (Gaadiidka Tri-CAP) waa adeeg gaadiid dadweynee oo bixiya adeega baska dadweynaha oo ay dadweynuhu raaci karaan iyada oo aan la sameyneynin takoor ku saleysan da', dakhli, ama shuruudaha u-qalmitaanka.
Basaska Tri-CAP waxay ku qalabaysan yihiin wiishash si loo qaado kuraasta curyaanka, mootooyinka iyo qalabka gargaarka dhaqdhaqaaqa. Gaadiidka Tri-CAP waxay sameeyaan adeeg ah ka qaadid iyo geyn goob ilaa goob kale ah oo ay heli karaan dhammaan shakhsiyaadka isticmaalaya adeegyadayadeena.

Rakaabku waa in ay keenaan dhaweeyahooda ama adeegaha gaarka ah haddii heer-adeeg oo sarreeya loo baahan yahay.
Raacitaanada baska waxa la sii balansan karaa ilaa laba toddobaadyo ka hor. Balamaha in waqti hore la sii qabsado ayaa lagu talinayaa maadaama dhammaan rakaab qaadinaanka balamahooda uu ku socdo nidaam ah in balamaha loogu dhigo sidii loo soo kala horeeyay. Codsiyada adeega baska dhamaantood waa in lagu sameystaa taleefan adiga oo wacaya Xarunta xiriirinta Tri-CAP. Kansalidda/Joojinta balanta raacitaanka baska waa in la sameeyaa 24 saacadood ka hor mar kasta oo ay suurtagal tahay. Iyada oo ku xiran go'aanka shaqaalaha xafiiska Tri-CAP, baajinta balan in ka yar 24 saacadood waxa lagu qeexi karaa ballamaha la iska maqnaaday taas oo keeni karta digniin in lagu siiyo.

Tri-CAP waxay xaq u leedahay in ay hakiso adeegga 3 iska maqnaansho (no-shows) kadib.

**Maalmo Aanu Adeegu Jirin**
Xafiisku waa xiran yahay oo ma jiro adeeg bas maalmaha fasaxa qaranka ah iyo maalmaha in-service (shaqada-gudaha) ah sanadka oo dhan.
a number of national holidays and in-service days
throughout the year. Fadlan booqo bogeena www.tricap.org si aad u hesho liiska hadda jira ee maalaha aanu adeegu jirin.

***Ka hubi bogeena interneka wararkii ugu danbeeyay ee xiritaanada iyo macluumaadka jidka la xiriira route information***

**Xiritaanka la Xiriira Cimilada ama Xaaladaha Degdegga ah ee lagu Dhawaaqay cajalad codka fariimaha ah ee xafiiska ayaa lagu duubi doonaa iyo sidoo kale xarumahan soo socda:**
**WJON AM 1240 iyo WWJO FM 98.1 ee St. Cloud, KASM AM 1150 iyo KDDG FM 105.5 ee Albany iyo WQPM 1300 AM, KCLD 104.7 FM St. Cloud and KFML FM 94.1 Little Falls.**




# Qiimaha buska

Qiimo sax ah (lacag go'an) ayaa loo baahan yahay marka baska la raacayo. Darawaladu lacag ma sarifi karaan.

- Safarrada magaalada gudaha waa $2.00 halkii mar ee la raaco
- Safarrada miyiga waa $4.00 halkii mar ee la raaco
- Carruurta da'doodu tahay 2 sano jir iyo wixii ka yar waxay baska ku raaci karaan bilaash marka ay la socdaan qof weyn oo lacag bixinaya
- Heerarka lacagaha baabuur raaca waa la bedeli karaa
- Khadaka miyiga aada ma shaqeeyaan haddii rakaabku ka yar yihiin 5 qof oo rakaab ah

# Maxaad ka filan kartaa

- Darawaliin iyo Xiriiriyeyaal Wanaag iyo Saaxiibtinimo leh
- Shaqaalaha Gaadiidka Tri-CAP waxay u hoggaansamaan dhammaan xeerarka federaalka, gobolka, iyo kuwa deegaanka ee khuseeya
- Waxaan joogeynaa in aan ahaano goob shaqo oo aan daroogo iyo aalkolo xor ka ah
- Darawalada ayaa ku siin doona kaalmo marka loo baahdo si rakaabka si badbaado leh ay baska ugu soo galaan ugana soo degaan
- Baabuurku wuxuu ahaan doonaa mid nadiif ah oo aad ka heleyso jawi ammaan ah
- Darawalada basaska dhamaantood waxay haystaan laysin CDL ah waxayna raacaan sharciyada iyo qawaaniinta wadista ee Gobolka Minnesota
- Darawalada basaska waxaa loo tababaray gargaarka degdega ah ee aasaasiga ah
- Darawalada basaska waxaa loo tababaray isticmaalka wiishka iyo xiritaanka saxda ah ee qalabka socodka loo isticmaalo

# Xarunta xiriirinta

**Isniin-Jimco, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo**
**Sabti 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo**
**320-251-1612 ama 888-765-5597**

Farimaha waxa lagu reebi karaa telefoonka saacadaha ka baxsan waqtiyada shaqada iyo fasaxyada. Farimaha waxaa dib loo eegaa/dhageystaa maalinta shaqada ee xigta ee caadiga ah.

# Si aad u dhigato balanta Safarkaaga

- Wac Xarunta Xiriirinta Tri-CAP
- Rakaabka markii ugu horeysay ku safraya waxaa la waydiin doonaa magaca, ciwaanka guriga, lambarka taleefoonka, xiriirka degdega ah iyo taariikhda dhalashada
- Sii xiriiriyaha macluumaadka safarka oo faahfaahsan oo ay ku jiraan magaca, taariikhda, wakhtiga safarka loo baahan yahay, ciwaanka laga qaadayo iyo meesha uu u socdo
- Waxaa lagu talinayaa in la siiyo ugu yaraan 30 daqiiqo laga soo bilaabo wakhtiga qaadista ilaa imaanshaha ballamaha wakhtiga la dhigay
- Sheeg qof kasta/dhammaan rakaabka kula safraya (qofka wehelka ah ama kaaliyaha waxay ku raacayaan bilaash)
- Bixi macluumaad kasta oo ku saabsan kaalmada loo baahan karo (tusaale: xayawaanka adeegga, wehelka, kaalmada loo baahan yahay iwm.). Codsiyada adeega iyo kaalmada macquulka ah waa in la sameeyaa marka balanta la dhiganayo
- Haddii aad ogtahay waqtiga aad joogi doonto meesha aad ku socoto, xiriiriyahaaga ayaa kaa caawin doonta jadwalka soo noqoshadaada
- Sii macluumaad kasta oo shakhsi ah oo la cusboonaysiiyay (isbeddelka lambarka taleefanka, baahida xaalada dhaqdhaqaaqa, iwm.)
- Haddii aad qorshaynayso sii istaagid meelo badan ah u sheeg xiriiriyaha xogtaas wakhtiga aad ballanta dhiganeyso
- Xiriiriyahaagu wuxuu isku dayi doonaa in uu ku waafajiyo wakhtiga soo qaadida ee jadwalka sameysan. Xiriiriyuhu waxuu kuu soo jeedin doonaa wakhti kale oo soo qaadis ah haddii codsigaaga aan la fulin karin. Baska Tri-CAP waxa laga yaabaa inuu yimaado **10 minutes** kahor ama kadib waqtiga balantaada la qorsheeyay.

*Jadwallada dhammaantood waa la bedeli karaa*